

# Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo ee ku saabsan qaaxada iyo jawaabahooda

### 1 Muxuu yahay cudurka qaaxada?
Qaaxadu waa cudur la kala qaado oo ay sababto bakteeriyada qaaxada ee loo yaqaanno *(Mycobacterium tuberculosis)*. Nooca qaaxada ee ugu badan waa nooca sambabka ku dhacda (qiyaastii 70 % ayay dadka ku dhacdaa). Noocyada kale sida qaaxada qanjidhka iyo tan lafaha lama kala qaado.

### 2 Waa maxay caabuqa qaaxada?
Qaaxaada macnaheedu waa in waqti ka mid ah nolosha qofka mar uun ay bakteeriyada qaaxadu gasho jidhkiisa oo ay kugu rido cudurkaas Marxaladdan marka lagu jiro ruuxu/qofku **ma jirrana mana qabo cudurkaas.** Dadka cudurkaas uu ku dhacay (ilaa 90 %) **marnaba** cudurkaasi ma soo rito.

### 3 Sidee Qaaxaada lagu kala qaadaa?
Hawada ayaa la isugu gudbiyaa qaaxada, qof-ka-qof ahaan. Marka ruuxa qaaxada qaba uu qufaco, waxaa afkiisa ka soo baxa oo hawada raaca dhibco qoyan oo xambaarsan bakteeriyada qaaxada. Gobo'dan waxay sabaysaa hawada in muddo ah neef ahaan ayayna u qaadan karaan dadka kale. Khatarta in qaaxo la qaado waxay keliyaa jirtaa marka aad xidhiidh la samaysid **ruux qaaxada sambabka qaba.** (su'aasha 6-aad).

### 4 Goormuu qofku cudurka qaaxada ka hadli karaa?
Waa marka qaaxadu ay sambabka ku fiddo. Tani waxay iman kartaa bilo ama sannado ka dib marka uu ruuxu cudurka qaaday. Bakteeriyadu jidhka intiisa kalena way ku faafi kartaa iyada oo raacaysa dheecaanka jidhka (sida qanjidhada, qaybta neerfaha, lafaha). Noocyadaas qaaxada ah lama kala qaado. Khatarta qaaxadu waxay aad ugu sii daran tahay carruurta iyo dadka difaacoodu daciifka yahay. Xilligan aan joogno qaaxada si fiican baa loo daaweyn karaa haddii daawaynta si fiican loo maareeyo.

### 5 Waa maxay astaamaha lagu yaqaanno qaaxada?
Cudurku wuxuu ku billawdaa wax yaabo yaryar oo dadku ka sheegtaan. Waxyaabahaas waxaa ka mid ah qufaca (mararka qaarkood xaakada waxaa la socda dhiig), daal, xoogaa kulayl iyo dhidid habeenkii ah. Heerarka dambe, bukaanku wuxuu dareemi karaa culayskiisa oo dhaca, abiteedka oo ka xumaada iyo xabadka oo xanuuna.

### 6 Goormaa qaaxada sambabka la kali qaadi karaa?
Qaaxada sambabka waxaa la kala qaadi karaa marka uu cudurku sambabka aad ugu faafo ilaa ay ka gaadho in ruuxu marka uu qufacayo (ama hindhisayo uu hawada mariyo dhibcaha bakteeriyada qaaxada). Ilaa inta marxaladan laga gaadhayo ruuxa ku lugta leh ma gudbin karo bakteeriyada oo ma qaadsiin karo dadka kale. (su'aasha 3-aad).

### 7 Ilaa xilligee buu ruuxa qaba qaaxada sambabka u gudbin karaa dadka kale?
Ruuxa qaba qaaxada sambabka ee u gudbin kara dadka kale waa in isbitaal ama guri lagu karantiilaa, taasina waxay ka dhigan tahay dadka waa laga dhex saarayaa. Meeshaas gaarka ah ayaa lagu haynayaa ilaa inta **ayna cudurka gudbin karin.** Marka si fiican loo daaweeyo, khatarta caabuqu si degdega ah ayay hoos ugu dhacdaa, oo hal ilaa laba isbuuc daawaynta ka dib, khatartu caabuqu guud ahaan waa eber. Daawayntu, si kastaba ha ahaatee, waa inay sii socotaa muddo lix bilood ah ama ka badan, iyadoo lagu samaynayo kormeer caafimaad, ilaa inta qofku gabi ahaan ka bogsanayo.

### 8 Yaa khatar ugu jira cudurka?
Dadka khatarta ku jira waa kuwa u soo dhawaada ruux qaaxada sambabka qaba oo gudbin kara (haddii ay saacado badan hal qol kula jiraan) (Su'aasha 6-aad).

**9 Waan tallaalanahay. Ma anoo tallaalan buu igu dhici karaa?**
Haa, maxaa yeelay tallaalka la qaato ee ka dhanka ah qaaxada (BCG) ee sida caadiga ah loo qaato wuxuu ku siinayaa kahortag yar.

**10 Waxaan xidhiidh la sameeyey ruux qaba qaaxada sambabka. Maxaan hadda sameeyaa?**
Xafiiska Qaaxada ee Jimciyadda Sambabka (Tuberculosis Office of the Cantonal Lung Association) ee xaafadaada ayaa kaa siin kara talo iyo tusaale lacag la'aan ah oo ku saabsan qaaxada. Ruux kasta oo xidhiidh dhaw la sameyey ruux qaba qaaxada sambabka (Su'aasha 6-aad) wuxuu ballan ka qabsan karaa xafiiska qaaxada (cinwaanada lifaaqan) si uu u helo macluumaad iyo si loo baadho oo loo ogaado in uu cudurka qaaday (Su'aasha 12-aad).

**11 Waxaan xidhiidh la sameyey ruux qaba qaaxo laakiin aan ahayn mida sambabka. Maxaan hadda sameeyaa?**
Uma baahnid in aad wax samaysid, maxaa yeelay khatar kuma sugnid. Noocyadan qaaxada la isuma gudbiyo maxaa yeelay ruuxa qaaxada qaba afkiisa kama soo baxayaan bakteeriya hawada raacaysa.

**12 Sidee lagu ogaan karaa in cudurka la qaaday?**
Waxaa lagu ogaan karaa baadhitaanka maqaarka ama baadhitaanka dhiigga (loona yaqaanno inter-feron gamma test). Macluumaad ku saabsan baadhitaanka, fasiraadiisa iyo natiijada waxaad waydiin kartaa Xafiiska Jimciyadda Qaaxada ee xaafada (Cantonal Lung Association).

**13 Dadka ka wayn 12 jir, baadhitaanka dhiigga laguma sameeyo ilaa ay ka soo wareegto 8 toddobaad markii ay ruux qaaxada sambabka qaba ay xidhiidh la sameeyeen. Waa maxay sababtu?**
Bakteeriyada qaaxadu tartiib ayay u badataa, hawlgalka difaaca jidhkuna wuxuu bilaabmaa dhawr todobaad kadib. Taasi waxay ka dhigan tahay in 8 todobaad ka hor ayna suurtagal ahayn in la ogaado in caabuqu dhacay ilaa laga gaadhayo sideed isbuuc ka dib. Khatarta qaadidda noocan aadka u daran ee qaaxadu waxay ku badan tahay carruurta 12 jirka ka yar Waxaa intaas dheer, cudurkan aad ayuu ugu faafaa caruurta da'aadan jirta. Sidaas darteed, si aan isu ilaalino, baadhitaan horudhac ah ayaa carruurta lagu sameeyaa **isla markiiba** ka dib markii ay ruux cudurka qaba xidhiidh la sameeyaan, waxaana ku xiga baadhitaan kale kaasoo la sameeyo 8 toddobaad kadib.

**14 Badhitaanka dhiiggu wuxuu sheegayaa inaad cudurka qabto (togan). Maxay taasi ka dhigan tahay maxaase xiga?**
Haddii lagaa helo (togan) cudurka waxay ka dhigan tahay in bakteeriyada ay jidhka xidhiidh la sameysay. (Su'aasha 2-aad). Xafiiska Qaaxada ayaa adiga iyo dhakhtarkaaga idiin ogeysiin doona, wuxuuna xafiisku kaa codsan doonaa in aad ballan qabsatid si baadhitaan qoto-dheer loo sameeyo (raajo iyo wixii la mid ah), waxaana baadhitaanka qotoda dheer looga jeedaa in la sugo in ruuxu uu qaaxada qabo ama uusan qabin.

**15 Waan qaaday cudurka. Dadka kale khatar ma ku ahay?**
Maya! Bakteeriyada oo aad qaado macnaheedu ma ahan in qaaxo kugu dhacday mana ahan macnaheedu in aad gudbin kartid. (Su'aalaha 2, 4 iyo 6). In cudurka dhiiggaaga laga helay macnaheedu ma ahan in aad dadka xidhiidhka kula sameynaya aad khatar ku tahay.

**16 Waan qaaday cudurka. Khatar intee le'eg ayaan ugu jiraa in maalin uun cudurku i soo rito?**
Difaaca jidhka ayaa cudurka raadsada wuuna is gaabiyaa. 90 % ka mid ah dadka bakteeriyada qaaxadu saamayso, **kumaba** dhacdo qaaxo. 10 % ka mid ah iyaga ayey qaaxadu ku dhacdaa. Dadkaas, nuskood laba sano gudahooda ayey ku dhacdaa, nuskoodna xilliyo dambe oo noloshooda ka mid ah (Su'aasha 4-aad). Khatartu waxay sii badan tahay marka difaacu daciif yahay (sida dadka fayraska HIV-ga qaba, isticmaalka xilli dheer daawada cortsone ama daaweynta kiimoterabiga ee difaaca jidhka hoosta u dhiga ama haddii ruuxu qabo sonkorow ama isticmaalo khamro ama tubaako).

**17 Mar haddii aan bakteeriyada qaaday ma la i daawayn karaa?**
Mar haddii la hubsado in aad cudurka qaaday (Su'aasha 2-aad) waxaa lagu daweeyaa daawooyin antibaayoyik ah. Ayada oo ay ku xidhan tahay nooca antibaayootiga la adeegsanayo, daaweyntu waxay qaadataa afar ilaa sagaal bilood. Taladu waa in aad daawada qaadatid, maxaa yeelay waxay aad hoos ugu dhigaysaa in aad dib dambe qaaxo u qaadin. Daaweynta noocaas ah in la samaeeyo iyo in kale waa in go'aankeeda ay wada qaataan qofka xanuunsan iyo dhakhtarka daawaynaya.

**18. Yaa bixinaya lacagaha?**
Xaafaduhu way ku kala duwan yihiin qaybsiga qaraamaha/kharashaadka daaweynta ee cudurka qaaxada. Xafiiska Jimciyadda Sambabka (Cantonal Lung Associa tion) farxad ayay u tahay in ay ku siiyaan macluumaadka qoddobada la dabaqi karo ee xaafadaada laga adeegsado.

**19. Ka sokow xafiisyada Qaaxada ee ku yaala xaafadaha, ma jirtaa xarun qaran ee Iswiizerlaan leedahay oo lala xidhiidhi karo si su'aalo ku saabsan qaaxada loo waydiiyo?**
Haa, waxaa jirta Xarunta Maaraynta Qaaxada (Competence Centre Tuberculosis) ee raacsan Jimciyadda Sambabka ee Ururka Sanbabada Swiss (Swiss Lung Association) xaruntaas oo Xafiiska Caafimaadka Dadwaynaha ee Federaalka ee caafimaadku uu hawlo kala gadisan u xil saaray. Faahfaahin dheeri ah waxaa laga heli karaa barta www.tbinfo.ch.

**20. Sidee loo sameeyaa baadhitaanka xidhiidhka/u dhowaanshaha qofka qaaxada qaba?**
Marka xaalad qaaxo la baadhayo, waa in ay tani u soo sheegaan dhakhtarka qofka daaweynaya, iyo shaybaarkuba Sarkaalka Caafimaadka ee Xaafadda ee deegan xaafadda uu qofka qaba qaaxada deggan yahay. Sarkaalka Caafimaadka ee Xaafadda ayaa go'aan ka gaadhaya natiijada baadhitaanada, in la sameeyo baadhitaan xidhiidh iyo in kale. Arrintaa waxaa la sameeyaa haddii la ogaado in cudurku uu yahay qaaxada sambabka ku dhacda ee la kala qaado. Mararkaas oo kale, Xafiiska Qaaxada ee Jimciyadda Sambabka ee Xaafadda ayaa samayn doona baadhitaanka xaddiidhka. Jimciyaddu waxay la xidhiidhi doontaa bukaanka. Waxaa la qoraa liiska magacyada dadka ay dhici karto in ay khatar ugu jiraan inuu cudurkani ku dhoco (Su'aasha 8-aad). Sida qaannuunku yahay, kuwani waa dadka ka tirsan qoyska, asxaabta mar walba isla jooga, dadka shaqo wadaaga ah ama dadka wada ciyaara ama nashaadyada lala sameeyo. Dadkan ayaa arrintan la ogeysiiyaa waana laga baadhaa in cudurku ku dhacay iyo in kale (Su'aasha 12-aad).

**Ma ogayd in …**

… qaaxadu tahay cudur la isu gudbiyo oo ay tahay in loo soo sheego Xafiiska Federaalka ee Caafimaadka Guud (Federal Office of Public Health (FOPH)?

… dalka Iswiizerlaan, tirada dadka ay ku dhacdo qaaxadu sannadihii dambe ay ahayd inta u dhexeysa 350 ilaa 550 ruux sannad kasta?

… qaaxada si fiican loo daaweyn karo, waa haddii daawada loo qaato qaabka ay ku talo bixiyeen Jimciyadda Sambabka ee Swiss (Swiss Lung Associa tion) iyo Xafiiska Federaalka ee Caafimaadka Guud (FOPH).

… qiyaastii ilaa 1,13 milyan oo ruux sannadkii oo ku sugan daafaha caalamka oo dhan inay u dhintaan cudurka qaaxada (waxaana ugu badan wadamada soo koraya)?

Warqadda Xaqiiqada ee Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo (Fact sheet FAQ) oo ku qoran luuqado kale:

**Competence centre tuberculosis**
Sägestrasse 79
3098 Köniz
Phone 031 378 20 50
tbinfo@lung.ch
www.tbinfo.ch



SWISS **LUNG** ASSOCIATION